


Ka warran haddii aanan awoodin dhaqaale ahaan in la talaalo caruurtaada?

Talaalka caruurta badanaa lacag laga ma bixiyo marka qoysasku aanay awoodin dhaqaale ahaan. Wac lambarkan 800-232-2522 ama wac laanta caafimaadka gobalkaaga ama degmadaada si ad u ogaatid meesha ad ugu tagi kartid talaal aan lacag ahayn ama wax yar oo lacag ah lagaa rabo. Waxa arrintani ay saamaynaysaa caafimaadka caruurtaada!

Tani na imminka waa ogeysiis nabad ah oo ku socda waalidka!


Dadka waaweyn naftoodu waa ay u baahan yihiin talaalka, iyagu ba! Wac oo la hadal cisbitaalkaaga ama laanta caafimaadka si ad u ogaatid nooca talaalka ad u baahan tahay ama wakhtiga ay tahay in ad qaadatid talaalka kuu hadhay/haray. Caruurtaadu waxa ay kaa sugayaan in ad caafimaad ku jirtid!

Dhamaan caruurta da'doodu tahay 0-18 sannadood waxa ay u baahan yihiin talaalka jooniska/cagaarshowga noociisa B!



Qof kasta waa uu u baahan yahay talaal

Haddii ad awoodi karin dhaqaale ahaan ama aanad garanayn meesha laga heli karo talaal, la xidhiidh/xiriir laanta caafimaadka ee magaaladaada, degmadaada, ama gobalkaaga, ama wac lambarkan 800-232-2522.




Immunization Action Coalition
1573 Selby Avenue, Suite 234
St. Paul, MN 55104
651-647-9009
www.immunize.org
www.vaccineinformation.org

Qoraalka ku dhigan warqadan waxa hubiyay xagga saxnimada warka farsamada ah hay'ada Centers for Disease Control and Prevention. Waa qoraal aan lahayn xuquuqda qoraha. Xor ayaa ad u tahay in ad wax ka badashid oo ad ku dabaqid baahida cisbitaalkaaga ama beeshaada. Laakiin, haddii ad wax ka badashid, fadlan cadee in ad ka soo qaadatay qoraalka ururka Immunization Action Coalition.

www.immunize.org/catg.d/4055so.pdf

Item #P4055-12 Somali (4/98, reviewed 8/04)


Caruurta oo dhami waxa ay u baahan yihiin talaalka Jooniska/Cagaarshowga noociisa B!



Kuwa yaryar,



kuwa dhexdhexaad ah,



iyo kuwa waaweyn bal

Waa maxay joonis/cagaarshow noociisa B?

Jooniska/cagaarshowga noociisa B waa jiro culus oo ku dhacda beerka u keeno na nooc fayras. Fayraskani waxa u gali karaa dhiigga, ka dibna weerari karaa beerka, sabab na u noqon karaa jiro culus. Marmarka qaarkood, waxa fayrasku u jidhka/jirka u ku jiri karaa mudo dheer isaga oo beerka ku haya waxyeelo si joogto ah.

Sidee ayaa caruurta yaryar iyo tobaneeyo-jirka ahi ku qaadaan jooniska/cagaarshowga noociisa B?

Siyaabo farabadan. Jooniska/cagaarshowga noociisa B waxa lagu qaadi karaa sidan:

- abmarka lala kulmo ama u ku soo gaadho/gaaro dhiigga qof jirida qaba ama dheecaanka jidhka/jirka qofka jiran
- abmarka lala wadaago qofka jiran waxyaabaha ay ka mid yihiin burushka ilkaha ama caday/rumay, makiinad/sakiin, tuwaalka/shukumaanka, ama irbadaha/cirbadaha
- abqaniinyada dadka
- abla yeelasho galmo qof jirada qaba
- abdhago daloolin, dalool meel kale oo jidhka/jirka lagu sameeyay, ama jidh/jir xardhid lagu sameeyay qalab aan nadiif ka ahayn cudurka



Saddex irbadood/cirbadood oo isku xiga ayaa lagaga badbaadi karaa jiradan culus!



Maxaa caruurta ay ugu baahan yihiin talaalka jooniska/cagaarshowga noociisa B?


Dhamaan ururada dhakhaatiirta ee wadanka Maraykanku waxa ay isku raacsan yihiin in dhamaan caruurta da'dood tahay 0-18 sannadood ay u baahan yihiin talaalka jooniska/cagaarshowga noociisa B si ay uga badbaadaan cudurka. Wakhtigan aynu joogno, waa in dhamaan caruurta yaryar la siiyaa talaalka jooniska/cagaarshowga noociisa B marka la siinayo ilmaha yar talaaladooda kale ee caruurta. Haddii caruurtaada iyo ilmahaaga tobaneeyo-jirka ah aan laga talaalin jooniska/cagaarshowga noociisa B markii ay ilmaha yar ahaayeen, imminka sii talaal.

Ma waxa ilmaha ugu jiraan caruurta laga baqayo in u ku dhaco cudurka jooniska/cagaarshowga noociisa B?

Jooniska/cagaarshowga noociisa B qof kasta waa u ku dhici karaa. Laakiin, caruurta ku dhalatay, ama waalidkoodu ay ku dhasheen meel ka baxsan wadanka Maraykanka oo cudurka jooniska/cagaarshowga noociisa B aad ugu faafsan yahay, waxa suurogal ah in halis dheeraad ah ay u yihiin cudurka fayras keeno ee jooniska/cagaarshowga.

Meelaha cudurka jooniska/cagaarshowga noociisa B u dhibaato culus ka yahay waxa ka mid ah wadamada Aasiya, Afrika, Jasiiradaha Baasifiga, wadamada Bariga Yurub, wadankii loo yaqaanay Midowga Sufiyeeti, iyo wadamada Koonfur Ameerika.

Haddii aanad hubin heerka u ku suganaa fidsanaanta cudurka jooniska/cagaarshowga noociisa B wadankii ad timi, la hadal dhakhtarkaaga ama laantaada caafimaadka dadweynaha. Waxa laga yaaba in dhakhtarkaagu u tijaabiyo caruurtaada wakhtiga ay qaadanayaan talaalka ugu horeeya si uu u hubiyo in aanay qabin wakhtigaa cudurka nooc fayras keeno ee jooniska/cagaarshowga noociisa B.



Ma ogalaadaa in caruurta ay ugu baahan yihiin talaalka jooniska/cagaarshowga noociisa B?

Caruur badan ayaa imminka lagu siiyaa talaalka jooniska/cagaarshowga noociisa B dugsiga waxbarashada. Haddii ilmahaaga lagu siinayo talaalka dugsiga waxbarashada, waxa ad ka baxsan doontaa adiga iyo/ama ilmaagu saddex jeer oo lagu noqnoqdo xafiiska dhakhtarka!

Sidee baa talaalku u yahay mid nabad/amaan ah?



Talaalka jooniska/cagaarshowga noociisa B waa mid ka mid ah talaalada ugu nabad/amaan badan. Waxa lagu isticmaalayay wadanka Maraykanka ilaa 1981, waxa na la arkay in u yahay mid nabad/amaan ah waxtar na leh.